


Waa maxay cudurada aad kaqaadi karto qaniinyada eyga?

Qaniinyada eyga ma keeni karto keliya dhaawac ee waxay keeni kartaa faafinta jeermis. In kabadan 18% ee ah qaniinyada eygu waxay keentaa caabuq. Kabadan 60 nooc oo bakteeriyaa kala duwan ayaa laga helay afka eyga, laakiin keliya wax yar oo tirada jeemisyadaas kamid ah ayaa kuu keeni kara in aad jirato.

Raybisku waa mid ka mid ah cudurada ugu ba'an ee dadku kaqaadaan qaniinyada eyga. Ka-qaadista eyga cudurka raybiska gudaha Maraykanka waa mid ay yartahay. Raybisku waa fayras waxyeeleeya maskaxda loona dhiman karo. Sida ugu badan ee raybisku u fido waa tooska qaniinyada xayawaanka qaba cudurka. Cudurka waxaa looga hortagi karaa tallaalista eyda. Intaas waxaa sii dheer, waa in dadka eydu qaniinto ay islamarkiiba helaan daawayn si looga hortago raybiska.

Daryeel-caafimaad bixiyayaasha Boston waxaa laga rabaa in ay usoo sheegaan dhammaan qaniinyooyinka eyda dhinaca Golaha Caafimaadka

Dadweynaha Boston. Golaha Caafimaadka Dadweynaha Boston waxay la shaqaysaa daryeel-caafimaad bixiyayaasha iyo Xakamaynta



Xayawaanka "Boston Animal Control" si loo hubiyo in dhammaan daawaynta daruuriga ah iyo la-socoshada la sameeyey.

Sida dadka oo kale, **eydu way kuficanyihiin xiriirka**, laakiin waxay u baahantahay barasho ah in ay dadku fahmaan waxa wejiga iyo jirka eygu ay sheegayaan. Inta badan dadku waa fahmi karaan calaamadaha eyga dirirsan ee aan rabin in la taabto (muujinta ilkaha, iyo gurxanka). Si kastaba ha ahaatee, qaniinyada eyga badi waxay dhacdaa marka qofku garan waayo calaamadaha sheegaya in eygu rabo in aan la taaban, xataa haddii aanu eygu cadho qabin ama xanaaqsanayn. Calaamadaha qaar ee cabsigelinta ama cadhada eyga ee aan la arki karin waxaa kamid ah:

- Madax foorara, hoos u-degsan, ama jeedsan.
- Saynta oo hoosaysa, kudhexjirta lugaha, ama sitacbaan ah u lulmaysa.
- Afxiran.
- Dhego gadaal u dhegsan ama hoos u degsan.
- Timaha dhabarka kacsan, gaar ahaan saynta.
- Tirigsanaan ama istirigis dhammaan ah, qalalsanaan ama gariir.
- Indho-caddayn, muujinaya cadaanta indhaha eyga oo kabadan sida caadiga ah.
- Kucelcelin cida eyga ah oo ay lasocoto, guux gaaban ama sare.
- U-dhaqma si nasasho la'aan ah.
- Iskudaya isqarin uu isku qariyo gudaha ama gadaasha waxyaabaha.
- Hamaahsi degdega ah.
- Dhareer xad-dhaaf ah.
- Aan xiisaynayn cuntada.
- Neefsasho hoosaysa ama neeftuur degdeg ah.
- Dabeecad cabsi ah, sida leefidda dibnahooda ama xoqista sidii uu cuncun hayo.

Si aad wax dheeraad ah uga barato kahortagga qaniinyada eyga, booqo [boggeena internetka](#).

Kahortagga Qaniinyada Eyga



Boston Public Health Commission
Infectious Disease Bureau
1010 Massachusetts Avenue
Boston, MA 02118
www.bphc.org
617-534-5611

Ku-dhawaad 4.5 milyan qaniinyo ey ayaa kadhaca sannad kasta gudaha Ameerika. Baro sida looga hortago qaniinyada eyga loona yareeyo halista jirro iyo dhaawac!

Qofkee halis ugu jira qaniinyada eyga?

Carruurta. Heerka dhaawaca laxiriira-qaniinyo-ey wuxuu aad ugu sarreeyaa carruurta 5 illaa 9 sanno jirka ah. Carruurta ayaa aad ugaga badan qaangaarka in ay helaan daryeel caafimaad laxiriira qaniinyo ey. Muwaadiniinta waayeelka ah ayaa ah kuwa labaad ee dhibanayaasha u ah qaniinyada eyga.



Halkee ayey kadhacdaa qaniinyada eyga?

Nus in kabadan dhaawacyada qaniinyada eygu waxay kadhacdaa guryaha ay joogaan ey la yaqaan. Carruurta iyo qaangaarkuba, guri kuhaysashada ey waxay keentaa halis u ahaansho badan in qaniinyo ay dhacdo. Marka ay tirada eydu kusii badato guriga, fursadda ah in qaniinyo dhacdana way sii badataa.

Kahortagga Qaniinyada

Eyga:

Tallooyin badbaado aasaasi ah



Samee:

- Ha dhaqdhaqaaqin ("isu taag sida geed camal") marka uu kusoo dhawaado ey aanad garanayn. Ahaw dhaqdhaqaaq la'aan oo isdeji.
- Iska-ilaali toos in ay indhihiinu isugu dhacaan eyda aanad aqoonin.
- Sug inta uu eygu kudhaafayo
- Haddii eygu dhulka kugu rido, isku duuduub sida kubad camal oo madaxa hoosta gasho gacmahana kudabool dhagaha iyo qoorta
- Si dhakhso ah ula socod sii qof qaangaar ah eyda meeraysanaysa ama eyda u dhaqmaysa si aan caadi ahayn.

Ha samayn in aad:

- U-dhawaato ey aanad garanayn.
- Kacararto ey.
- Ka khalkhasho oona samayso qaylo dheer.
- Kanixiso ey hurda, wax cunaya, ama haysta ey yaryar.
- Taabato ey adiga oo aan weydiin qofka wata haddii aad taaban karto.
- Taabato ey adiga oo aan u oggolaanin in uu ku arko oo uu ku uriyo marka hore.
- Ku dhiirigeliso in uu eygaagu kuula ciyaaro sidirirsan.
- U oggolaato in ay carruurta yaryar la ciyaaraan ey aan cidi wadan.



Kawarran haddii ey kuqaniino ama kusoo weeraro?

- Haddii ay suurtowdo, boorsadaada, shandadda, ama jaaketka dhexgeli adiga iyo eyga si aad isaga ilaaliso eyga.
- Haddii dhulka laguugu tuuro, sida kubadda isku-duub oo madaxa qarso oo gacmahaaga kudabool dhegahaaga iyo qoortaada.
- Markaad hesho meel ammaan ah, islamarkiiba kudhaq wixii nabar ah biyo iyo saabuun.
- Raadso daryeel caafimaad; waxaa laga yaabaa in aad u baahato antibaayotik ama daawo kale.
- Iska hubso in aad raadsato daryeel caafimaad islamarkiiba haddii:
 - Nabarku ba'anyahay (dhiigbax aan joogsi lahayn, daciifnimo, xanuun ba'an, muruq ama laf soo baxda).
 - Nabarku noqdo mid guduud ah, xanuun daran, kululaado, ama bararo, ama aad yeelato qandho.
- Inkasta oo halistu yartahay, qaniinyada eyguwaxay sidan kartaa jirada raybiska. Haddii lagu qaniino, laxiriir bixiyaha daryeelkaaga caafimaadka, Xakamaynta Xayawaanka Boston "Boston Animal Control" ama 617-635-5348 ama Golaha Caafimaadka Dadweynaha Boston "Boston Public Health Commission" (BPHC) lambarka 617-534-5611.
- Marka dhacdo loo soo sheego Golaha Caafimaadka Dadweynaha Boston ama Boston Animal Control. Waxay isku dayi doonaan in ay laxiriiraan qofka xayawaanka leh oo waxay hubin doonaan haddii xayawaanku qabo tallaalka jirada raybiska. Tani waa muhiim waayo qofka la qaniinay waxa laga yaabaa in uu u baahdo daaweynta kahortaga jirada raybiska.